# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### Kal-fadhigii 43aad Fadhigii 10aad

**Salaasa 10 August 2020**

**Quraanka: -** Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

Ajandaha Fadhiga:- Doodda Wax-ka-beddelka Xeerka La-dagaalanka Mukhaadaraadka.

**Md. Xuseen Axmed Caydiid** **(16min 55sec):-** Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha marka hore waan idin salamaayaa. Xeerkan magaca waa la soo kordhiyay xukuumadu waxay tyidhi xeerkii hore magac muu lahayn, marka qaabkan loo soo dhigay iyo qaabka ay gudiddu u dhigtay labadaba waxbaan ka saluugsanahay, Xukuumadu qaabkay u soo dhigtay Qodobka Magaca Xeerka oo tyidhi Xeerkan Waxa loogu yeedhayaa *"kaabista iyo Wax ka badalka Xeerka la-dagaalanka Mukhaadaraadka"*, halka Gudiddu u dhigtay Xeerkan Waxa looguyeedhayaa *"Kaabista iyo Wax ka badalka Xeerka la-dagaalanka Moondooriyaha"* oo ereygii mukhaadaraad bay maandooriya u badashay.

Halkan waxa maraya sideed Qodob oo laba cusub tahay lixna wax ka badal loo soo jeediyay, marka sideedaas qodob Xeerkii lagu daro xeerka magaciisu wax ka badalka iyo kaabista ma noqonaye ee magacii asalka ahaa buu ahanaya oo wax ka badal iyo kaabis lagu sameeyay 2020ka, marka waxaan soo jeedinayaa in Xeerka loogu yeedho **Xeerka La-dagaalanka Maandooriyaha ee kaabista iyo wax ka badalka lagu sameeyay Xeer Lr. 21/2020.**

**Qodobka 2aad** oo ka hadlaya Erey-biximaha waxa magac looga dhigay macnaha erey-bixinta, marka waxay ahayd in la yidhaahdo macnaha ereyada ama erey-bixin ee labadaas erey isma raaci karaan macanaha ay leeyihiin, marka waxaan soo jeedinayaa sidii caadiga ahaan jirtay ee **Erey-bixinta laga dhigo.**

Saddex erey-bixinood baa wax ka badal loo soo jeediyay oo kala ah Maandooriye, isticmaalka Maandooriyaha iyo caadeystaha maandooriyaha, waxaan inta badan taageersanahay sida gudiddu u dhigtay erey-bixinta, inyar uun baan ku dari lahaa ama aan ka badali lahaa, sida Maandooriye oo kale anigoo waafaqsan sida gudiddu u dhigtay hadana waxaan soo jeedinayaa ashyaada maadnooriyaha sida khamriga, xashiishada iyo wixii lagu dari karo in sidaa loo taxo hadii kale xeerku muhmal buu galayaayo marna

jaadkii baa loo adeegsanayaa marna iyadoo maxkamadii lagu cunayaa buu fasax noqonayaa, marka ha la taxo maandooriyaaha waxyaabaha Xeerku u yaqaano.

Ereyga *Isticmaalka Maandooriyaha* waxaan u qaatay sida gudiddu u soo jeedisay, ereyga Caadeyste loo bixiyay laba arin oo la isdaba dhigay oo maandooriyaha ama maandooriyayaasha, marka inta la is-daba dhigayo ereyga maandooriye waa jamac oo wax walba wuu koobaya, marka looma baahan inta islaash la dhigo hadana maandooriyayaasha la daba dhigo, marka maandooriye ah baa wixiiba koobaye ha loo daayo.

**Qodobka 3aad** oo sida gudiddu soo dhigtay qodobka 4aad oo noqon doona waxa title u ah isticmaalka maandooriyaha, marka waxaan soo jeedinayaa in cinwaanka Qodobkaasi noqdo **"Ciqaabaha ka dhalanaya isticmaalka maandooriyaha"** waayo inta la yyidhi isticmaalka maandooriyaha baa hadana faqradihiisa oo dhami waxay ka hadlayaan ciqaabo marka cinwaanku ha noqdo ciqaabaha ka dhalanaya isticmaalka maandooriyaha. Farqadaha qodobkan waxan taageeray soo jeedinta Gudiddu laakiin waxaan iyana wax ka odhanaya meel kooban kuwaas oo laga dhigay waxa loo raacayaa shareecada islaamka sida Farqada 1aad, kii xukuumadu soo gudbisayna waajibiyay waxay shareecadu ka odhanayso sida afartan jeedal oo kale ayuu xusay, Gudiddu way qarisay oo waxay tidhi shareecada loo raacaya, marka waxaan soo jeedinayaa ilayn wixii Maxkamad buu tagayaa oo cuskanayse, waa in xeerku muhmal aanu galin ama aanu wax maqan waajibinoo garsooraha inuu isagu raadsado aan laga dhigin ee halkan loo dhigo wuxuu adeegsanayo sida waxa shareecadu waajibisay ee jeedalka ah sidiisa loogu dhigo ayaan soo jeedinayaa, marka waxaan leeyahay Xeerkan ha loogu sheego garsooraha wuxuu adeegsanayo ee yaan la odhan isagu research ha sameeyo, qodobkaas faraqadiisaha inta kale waxaan ku **raacsanahay sida gudidda.**

**Farqada 6aad** ee soo jeedinta Gudidda laba arrimood bay isku ciqaab ka wada dhigoon oo qofka qof u qariya maandooriye iyo qofka qof ku khasba labadiiba isku ciqaab bay gudiddu soo jeedisay, anigu waxaan soo jeedinaya in labadaas la kala qaado oo qofka u qariya iyo qofka ku khasba waxaan qabaa inay kala ciqaab xun yihiin oo dee kan khasba ee inta qofka la xidh-xidho irbad lagu mudayo ama lagu quraaminayo si khasab ah waxaan qabaa inuu ka ciqaab xun yahay, marka waxaan soo jeedinayaa intaynu labadaas kala qaadno kan hore sida gudidda aynu u dayno, kan dambena mar hadii kii hore 5-8 ahaa kan dambe ha laga dhigo 7-10 sano si loo dhaafin karo 7dii kii hore maximum-ka u ahaayd oo ilaa 10 sano mararka qaarkood ha loo cuskan karo baan odhan lahaa anigu oo laba farqadood ha laga kala dhigo farqadaas laba qof.

**Qodobka 4aad** oo ciwaankiisu yahay ka gancsiga, samaynta, soo galinta maandooriye, marka halkaasna sidii qodobkii hore ciqaabu tilmaamayaaye ha laga dhigo cinwaanka ciqaabaha ka dhalanaya ka ganacsiga, samaynta, haysashada iyo beerisga oo aan soo

kordhiyay iyo soo galinta maandooriye dalka, title-ku noqdo **"ciqaabaha ka dhalanaya ka ganacsiga, samaynta, haysashada, beerista iyo soo galinta maandooriye dalka".**

**Farqada 1aad** oo u dhigan qofkasta oo isticmaale maandooriye oo ay maxkamad horteed kaga cadaaato waxa lagu ciqaabayaa ciqaabta ku xusan shareecada islaamka iyo ciqaab xadhig ah oo dhan 1-2 sanadood oo xadhig aan iib lahayn ah, marka waa sidii qodobkii hore ee shareecadu waxay qabto waa in la cadeeyaa oo halka isagana aynu ku dhigna imisa jeedal bay ka waajibisay ma afartan jeedal baa mise wax ka badan, marka qodobka aynu ku cadeyno ciqaabta shareecada oo loo adeegsanayo. Halka farqadan siday gudiddu u soo jeedisay ereyga ah "ama si uun u haysta maandooriye" xaga dambe ha laga raaciyo haysashadaas qofku wuxuu haysan karaa oo lagu qaban karaa wuxuu kaligii isticmaalayo ama wuxuu ka ganacsanayo ayaa lagu qaban karaa, labadaasina isku ciqaab noqon mayso oo qofka quraarad uu meel ka soo iibsaday lagu qabto iyo qofka gaadhi mugiis lagu qabta isku ciqaab noqon maayaan.

Marka halka waxaan odhan lahaa hadii uu si uun haysto xadi gali karra ganacsi hadii uu hasyto ayay ciqaabtaas wayni ka dhalan kartaa, hadii in uu cabo haysto way ka khafiifsan tahay, laakiin xadiga ganacsi galaya haysashadeedo waxay la mid tahay kan dalka soo galinaya ama beeranaya oo ha la galiyo inuu xadig ganacsi gali kara haysto.

**Farqada 4aad** ee isla qodobkaas, oo sheegaysa in gaadiidka lagu qabto maandooriye ee maxkamad horteed kaga cadaato waxa marka hore lagu ganaaxayaa 50 miliyan oo shilling, marka labaadna 100 milyan oo shiiling marka sadexaadna waa lala waraeegayaa, marka waxay ila tahay gaadiidku markooda hore isku qiimo maaha isku mugna ma qaadayaan oo gaadhiga fitiz ah iyo gaadhiga isjiidka ah iyo diyaarad ama markab isku mid maaha qiime iyo mug ahaanba oo way kala duwan yihiin.

Marka waxaan odhan lahaa halka laga waajibiyay 50ka miliyan oo ah $6 kun oo dollar meelahaas gaadhiga fitiz oo lagu qabto isagoo buuxa maandooriye, qiimaha gaadhigu waa $2 kun oo dollar, marka la yidhaahdo marka hore $6 ku dollar baa lagugu xukumayaa, marka dambena $12 kun dollar marka sadexaadna waa lala wareegayaa, dee markii u dambeysay buu ugu jabnaaday gaadhigii fitiz-ta ahaa taasina caqli maaha, marka.

Waxaan soo jeedinayaa si loo wada koobi karo gaadiidka oo dhan in laga dhigo boqolay ah oo tusaale ahaan gaadhiga lagu qabto marka hore lagu ganaaxaa boqolkiiba labaatan (20%) qiimihiisa marka labaadna boqolkiiba konton (50%) qiimihiisa, mar sadexaadka isagoo qiimihiisii ah ha lala wareego oo marka saddexaad ha ugu qiimo badnaato halka markii hore marka sadexaad ugu jabnayd. Anigu intaasaan ku soo koobayaa waad-mahadsan tihiin.

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf** **(1min 33sec):-** Xildhibaan Xuseen Caydiid intaas uu sheegay iyo qeexida uu sameeyay aad baan u waafaqsanahay oo waan wada

taageersanahay, wixii ciqaab ah waxaan waafaqsanahay in xaga shareecada islaamka ciqaabtu noqoto sida jeedalka oo kale, sucuudigaanu joogi jirno qofka wax dila waa la dilaa, dadku markay arkaan qofkii wax lagu qabtay oo suuqa lagu jeedalayo oo lagu soo xoomay aad bay dadka qalbigooda uga baqanayaan qofkaas oo kale, marka inta shareecada islaamka ku jirta yaan midh la tagine ha lagu daro, inta kale sidaas Xuseen sheegay gaadiid ha noqoto ama wax kale isagaan ku waafaqsanahay, marka waxaan anigu ku soo koobayaa xaga shareecada aynu u raacno xeerarka oo dhan sida xeerkan kufsiga inagu gal-galanaya. WSC.

**Md. Ibraahim Axmed Raygal** **(1min 10sec):-** ASC, WRWB, anigu laba qodob baan ku soo koobayaa hadalkayga tan kowaad waxa weeye sida uu xildhibaan xuseen u sheegay waxaan ku waafaqsanahay magaca xeerka labada qaybood magacyaday kala wataan inuu noqdo hal magac oo ah **"Xeerka la-dagaalkanka maandooriyaha"** taasi waa qodob.

Qodobka kalena waxa weeye, in la taxo noocyada maandooriyaha sida Xuseen Caydiid sheegay oo iyana aan ku raacsanahay oo inta liis lagu taxo waxa maandooriye loo yaqaan inta maanta aqoonta bini'aadmigu gaadhsiisan tahay sida khamriga, buuriga, qaadka, kiinanada kala duwan iyo IWM, oo liis taxan lagu qoro noocyada maandooriye ee xeerkani mamnuucayo ee lala dagaalamayo.

**Md. Cumar Axmed Saleebaan (Sanweyne)** **(6min 09sec):-** Hadaad eegto **Qodobka 3aad** ee Isticmaalka maandooriyaha waxa jira waxyaabo aynaan aqoon oo dawooyinka aynu isticmaalno hadaad eegtaan waxyaabaha ku jira 90% waxa ku qoran inaan qofku kaxayn baabuur ama mishiin aanad ku shaqayn, ama waxa ku jira inay ku seexinayso dawadaasi oo maankaadadoorinayso ayaa ku qoran.

Waxa kale oo jira xashiisada in imika dadka lagu daweeyo oo dad hargeysa jooga oo dakhtarku u qoraan aqaanaa, marka qodobkaas isticmaalka maandooriyaha waxaan soo jeedin lahaa in lagu daro macnihiisa "hadii aanu dhakhtar qorin" dakhtar la yaqaan oo aan kuwan dee dadka booyadaha biyaha ku rusheeya oo kale aan ahayn. Sidoo kale **Qodobka 4aad** ee qofka siinaya maandooriye qof kale ha lagu daro hadii dakhtar siiyo ku dawaynaya qofkaas in lagu daro ayaan soo jeedinayaa anigu. Sidoo kale waa in qodobka 6aad intaas lagu daraa.

**Qodobka 5aad farqadiisa 5aad** hadii qofku gurigiisii ka maqan yahay oo qof marti ahi is yidhaahdo guriga sii fadhiisto ama sii galaba ama sii seexdaba oo qofkaasi sito maandooriye ninkii guriga lahaana aanu ogayn anigu kiiskaas waan u soo joogay oo qofkii guriga lahaa lagu waayay kuwii kalena lagu helay, marka qofkani ma ku talogalay ayuu sharcigu ku salaysanyahay in manadooriye guriigiisa lagu iibiyo ama lagu isticmaalo ama lagu kaydiyo ama lagu hayo, marka anigu farqadaas waxaan ku dari lahaa waa in qofku ka warhayo waxa gurigiisa la keenayo. Waayo qofka hadii gurigiisa qof la soo galo oo aanu ogayn dambi qaban maayo.

Aduunku wuxuu la dagaalamaa qofka ka ganacsada mukhadaraadka, qofka ka ganacsanaya iyo qofka qaadnaya ee suuqa ku cabaya xashiisad ama kiniin way kala dambi badan yihiin oo isku dambi maaha, marka waa in la kala saaro qofkii keenayay ee soo dejinayay waayo qof lacag leh baa waxan sameyn kara, qofka cabaya ee suuqa joogana la dambi maaha.

Waxaan ku raacsanahay Xildhibaanadii iga horeeyay in la liis-gareeyo waxa maandooriye loo aqoonsanayo, iminka anaga hawdkaas waxa lagu dara biyaha bahal la yidhaahdo kiriir oo bahashaasaa cirka lagu maraa oo qaadkiiba waa la iska daayay, marka waa la baadha waxan oo la liisgareeya waxay yihiin. Dadka ka ganacsanaya iyo kuwa isticmaalaya waa in la kala saaro oo aanay sharciga u sinaan.

**Md. Cabdiqaadir X. Ismaaciil Jirde** **(6min 52sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Shirgudoonka iyo xyidhibaanadaba Asc wr wb, Gudoomiye waxbadan ku darimaayo ee midi waataa in Categories loo sameeyo, waayo waysocotaa oo wali may istaagin oo marwalba wax cusub ayaa soo baxaya oo aan hore loo aqoon ee waa in la Categories loo sameeyaa, Tusaale ahaan barigii dhaweyd ee uu Ingriisku Qaadka mamnuucayay waxa uu badalay Darajadii oo waxa uu ka dhigay Darajada "C" markaa waxay noqotay waxyaabaha mamnuuca ah qaarna waabay kasii waaweyn yihiin ee waa in loo sameeyaa categories ayaa fiican oo XASHIISHADA IYO COCAIEN-TU isku mid maha iyo Carak wax la yidhaa oo wey kala culusyihiin.

Sidaa uu Xyidhibaan Sanweyne sheegay ninka caadaystaha ah waxaa halkaa loo yaqaanaa nin xanuunsanaya oo daawo u baahan oo ka alcoholic ah iyo ka Drag addict waana la daaweeyaa oo waxaa jira Istitutions lagu daaweeyo oo isaga iyo kii ka ganacsanayay lama simo oo kan inta la qabto oo la dioxin-gareeyo oo la daaweeyo ayaa meel lagu hayaa.

Markaa inanka yare e xabaglaha ah ee halkaa joogaa waa inan xanuunsanaya cida danbiga lihina waa cida ka sii iibisa, Markaa waa in Culayska la saaraa SAMAYNTA IYO KA GANACSIGA labadaa ayaa wax walba ka culus.

Mideeda kale sidaa uu xyidhibaanku sheegay "nin ayaad dariiqa ka soo qaaday ama gaadhiga kaa amaanaystay waa laga helay gaadhigu danbi ma galin iyo ninkii lahaa toona ee ninkaa lagu qabtay ayuunbaa danbiga leh ee waxa uu gaadhigu danbi yeelanayaa hadii laga ganacsanayo oo ganacsi loo wado oo uu ninka gaadhiga lihi arinkaa involved ku yahay.

Waxaa iman doona Diyaarado, dakado ayaa furmi doona meelaha laga soo galiyaana waa maadaarada iyo dekadaha waaweyn oo niman Latin America jooga ayaa ilaashada dalalka yaryar ee noocaas ah ee aan fahamsanayn oo west Africa oo dhan way baabiiyeen hada Reer Clonbia, Gambia, Senegal, iyo Mauritania dhulkaa ayay soo mariyaan oo waxaa isku dhawaaday aduunkii oo diyaarado iyo maraakiib ayaa imanaysa.

Markaa culayska ugu weyni maaha kan Ethiopia laga keenayo ee waa kaa laga keenayo Latin America, Europe Iyo USA oo ayaandarada jirta dhalintii somaliyeed ee dalalkaa joogtay ayaa maanta involved ah oo qaarkood maanta yihiin kuwa waaweyn oo xyidhiidhkaa ayaa furmi doona.

Markaa Sidaa uu Xildhibaan Xuseen Sheegay ayaan Ganaax lacageed uun lagu xukumine ee qiimaha Diyaaradaa ama markabkaa waa in percent la saaraa waayo hadii aynu kontonkun nidhaa waxba maaha oo inanka halkaa ka soo diray ayaa samayn kara, lakiin marka aad markabkii ama diyaaradii xayirto waa lagaa leexanayaa, markaa in la kala saaraa waa mid aad u mihiin ah (1 taageero ayuu helay).

Waxaa dhacda in inan yar oo miskiin ah inta layidhaa waanu ku dalxiis gaynaa kharashbadan inta ay ku bixiyaan oo ay geeyaan meelaha Crebbin ay hadhawna shandadiisa ka soo buuxiyaan.

Markaa waxaan leeyahay hala kala qaado oo sidaa uu xyidhibaanku sheegay xashiishadu mararka qaarkood daawo ayay noqotaa oo iyada ama wax laga sameeyay ha noqdaane waxaan qabaa in la categories gareeyo oo aan kala saarno waayo inta aynu naqaan maahee waxyaabo kale ayaa soo bixi kara, oo dadka ka shaqaynayaa cilmi ha u yeesheen oo kala ogaadeen waxni waxay yihiin.

Waxaan ku raacsanahay Xuseen iyo mudanayaashii kalaba in la categories gareeyo cigaabtana loo kala kordhiyo, sidoo kale waa in percent laga qaada Gaadidkaa kala duwana waayo hadii kale joogsan maayaan wsc.

**Md. Saleebaan Diiriye Barre** **(3min 02sec):-** Ugu horayn waan salaamayaa Shirgudoonka iyo xyidhibaanada Golahaba, waxaan laqabaa in Magaca Xeerka lagu soo Koobo Xeerka la dagaaanka Mukhaadaraadka oo la cadeeyo Qodobkaa, waxaa kale oo aan intaa ku darayaa marka hore waxaynu nahay dad islaam ah oo sida dastuurkeena ku qoran wixii shareecada islaamka ka hor imanayaa waa mamnuuc ama waa waxba kama jiraan, markaa waxaan qabaa wixii sharciga islaamku inoo xadeeyay in aynaan waxba ka baddelin ayaan soo jeedinayaa waayo ilaahay isaga ayaa og waxa u danta ah Basharkiisa ee waa in waxa ay shareecada islaamku waxa ay ka qabto loo raacaa ayaan qabaa.

Waxaan la qabaa Xuseen caydiid iyo xyidhibaanadii kale sida ay taageereen in 5milyan diyaarad khamri ama Markab aan lagu xukumine ee waa in sidii uu xyidhibaankaasi sheegay laga dhigaa percent shayga alaabtaa sida ee lagu qabtay waxaanan qabaa in ay dadbani taa ku waantoobi doonaan ayna iska dayn doonaan.

Waxaa kale oo aan qabaa ciqaabta qofka la marinayo oo hadii suqa lagu jeedaliyo iyo qofka isaga oo aan cidiba arag jeelka loo dirayo way kala duwantahay oo ninka suqa lagu jeedaliyaa waxaa laga yaabaa in aanu dib ugu noqon, kan kale waxaan qabaa in marka

uu xadhigu ka dhamaado ama lacag laga qaadaa in uu halkii ka sii bilaabayo oo aanu daynayn.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in xadhigaas lagu xukumay dadkaa xashiishada sita ama gawaadhida leh in aanu xadhigoodaasi aanu iib yeelan oo waliba ciqaabtan 15sanana loo kordhiyaa oo aynan cidna raali galin oo aynu ciqaab dhab ah aynu samaynaa oo ayna dulmar inaga noqon wsc.

**Md. Xuseen Maxamed Cige** **(4min 41sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Gudoomiyaha iyo xyidhibaanada sharafta badanba Asc, Dooda saaka halkan ka dhacday anigu aad iyo aad ayaan ula dhacay waxaan filayaana in badankeeda la isku raacay, waxanan shirgudoonka ka codsanayaa in marka la qoro doodan la noo qaybiyo si aanu u eegno wixii laga baddelay.

Waxaan boqolkiiba boqol raacsanahay sidaa la yyidhi, lakiin laba qodob oo gaagaaban ayaan doonayaa in aan wax ka idhaahdo ugu horayn waxaan soo jeedinayaa in loo daayo xeerka Mukhaadaraadka oo kaliya waayo meelo kala ayuu galayaa la dagaalanku.

Xeerkan ina horyaala ee Golaha la keenay iima muuqdo in uu yahay xeer dhan ee waxa uu iila muuqdaa xeer kala dhiman, Tusaale ahaan waxaa la yyidhi mukhaadaraad markaa saw maaha in la yidhaa maxay yihiin mukhaadaraadkii hala doodee, markaa aniga waxay ila tahay maxaa mukhaadaraadka in page gaar ah loo sameeyo, tusaale ahaan waxaa la magac-dhabay qaadka oo kale, waanan ku raacsanahay in uu yahay qaadku mukhaadaraad, sidaa awgeed wuu kala duwan yahay mukhaadaraadku oo hadii layidhaa dadkeena oo cuna boqolkiiba 80 in la yidhaa waa mukhaadaraad e waa in la wada xidhaa waxaa qabaa in aanay macquul ahayn.

Waxaan odhan lahaa qaadku in kastuu mukhaadaraadka ku jiro in dawlada iyo dadku ila fahmaan sidii loo joojin lahaa 100 sanan ha qaadatee, waan in sida la sameeyaa waayo waad ogtihiin heerka uu inagu marayo oo waad ka garanaysaa in uu qaad cunay qofka dhalin yarada ah ee qaad ka cuna. Markaa waxaan leeyahay qaadkaa waa in mukhaadaraadka lagu daraa waayo dadkii wuu baabiiyaye waad mahadsantihiin.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ______________________ | ______________________ |